

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA
SARE

IMTIXAANKA FASALKA 8AAD. 2018

SAYNIS



XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND





SOM EXAMS

WASAARADDA WAXBARASHADA IYO TACLIINTA SARE XAFIISKA IMTIXAANAADKA PUNTLAND

Code Number

Imtixaanka Fasalka 8aad 2018
Amin 2 Saac iyo 10 Daqiiqo Akhris ah

SAYNIS

TILMAAMAHA IMTIXAANKA

- Waxaa imtixaanku ka kooban yahay 11 bog
- Tiri bogagga, hadday wax ka maqan yihiin u sheeg ilaaliyaha imtixaanka
- Haku qorin magacaaga iyo Roll lambarkaaga toona warqadda imtixaanka
- Hubi in waraaqda lifaaqu ku dhegen tahay imtixaanka, hadday kaa maqan tahay u sheeg ilaaliyaha imtixaanka.
- Lama ogola waraaqo dheeraad ah
- Jawaabtu hadday kaa qaldanto isku tallaab saar, kadibna qor tan saxda ah.

Imtixaanku wuxuu ka kooban yahay:

QAYBTA	DHIBCAHA
Qaybta 1aad: Goobo geli	33 dhibcood
Qaybta 2aad: Ka jawaab suaalaha	77 dhibcood
Wadarta: 100 Dhibcood	

Waxaa iska leh saxaha

QAYBAHA	DHIBCO
QAYBTA 1AAD	
QAYBTA 2AAD	
WADAR	%



Xafiiska Imtixaanka ee Puntland

Imtixaanka Sannad Dugsiyeedka 2018

Imtixaanka Maadada Saynis ee Fasalka 8aad

Boggan lama saxayo. Waxaa loo baneeyey feegaarka.

Handwriting practice lines consisting of multiple rows of dotted lines on a white background.

Boggan lama saxayo. Waxaa loo baneeyey feegaarka.

[illegible]

QAYBTA 1AAD: GOOBO GALI JAWAABTA SAXDA AH (33 DHIBCOOD)

1. Meerahee ayaa ugu kulul

- A) Yuraanas
B) Meerkuri

- C) Saatan
D) Maaris

2. **KEEBAAN** noolayaashaan dhalin ukun

- A) Shimbiraha
B) Kaluunka

- C) Raha
D) Jiirka

3. Walax ayaa leh cuf 440g mug 40 sm^3 , Hadaba Cufnaanteedu waa


- A) 20 g/sm^3
B) 15 g/sm^3

- C) 11 g/sm^3
D) 10 g/sm^3

4. Sawirkan waa birlab soo jiidatay walax


Hadaba, X waxay u taagantahay

- A) Caag
B) Dhagax
C) Bir
D) Dhalo



5. Sawirkan hoose wuxuu muujinaya shabakada cuntada. Imisa soo saare ayuu leeyahay shabakadan cuntada?

- A) 1
B) 2
C) 3
D) 4



6. Markii cusbo budo ah lagu daro biyo waxaa soo baxa


- A) Milme
B) Milan

- C) Mile
D) Biyo kaliya

7. Ardayda dugsiga dhexe ayaa waxay indho-indhayn jiheeyaha dabaysha oo tilmaamaya jiho sida sawirka ku cad.


Jiheeyuhu wuxuu tilmaamayaa in ay dabayshu u socoto dhanka

- A) Bari
B) Waqooyi
C) Galbeed
D) Koonfur



8. Xagasha u dhaxaysa falaar abaar iyo falaar noqod waa


- A) 30
B) 40
C) 50
D) 60



9. Fadumo culayskeedu waa 25 Kg, Ahmedna waa 40 Kg. Waxay ku fariisteen wiifow sida sawirka ku cad.


Hadaba si loo dheelitiro wiifowga waxaad ku darilahaa.

- A. Fadumo, walax culaykeedu yahay 15 Kg
B. Fadumo, walax culaykeedu yahay 10 Kg
C. Fadumo, walax culaykeedu yahay 40 Kg
D. Ahmed, walax culaykeedu yahay 5 Kg



10. Qalabkan sawiran wuxuu ku yaalaa meesha xarunta saadaasha cimilada.
Qalabkan waxaa loo isticmaalaa in lagu cabbiro

- A) Roobka
- B) Hawada
- C) Cadaadiska
- D) Heerkulka



11. Kebabaa sababi kara faalidka?


- A) xinjirowga dhiigga ee halbowlaha maskaxda
- B) xinjirowga dhiigga ee halbowlaha wadnaha
- C) xinjirowga dhiigga ee halbowlaha lugta
- D) xinjirowga dhiigga ee halbowlaha wadnaha

QAYBTA 2AAD: KA JAWAAB DHAMMAAN SU'AALAHADA SOO SOCDA (77 DHIBCOOD)

SU'AASHA 1AAD

Sawiradaan waxay muujinayaan habdhisyo kala duwan.

(11)



Ka jawaab dhammaan su'aalaha soo socda adigoo adeegsanaya xarfaha ku dul qoran sawirka

a) Waa maxay shaqada ay qabtaan xarfaha ku calaamadsan N iyo K

N _____ (4)
K _____

b) Tilmaam xarfaha u taagan habdhiska neerfayaasha.

_____ (11)

c) Sharrax sida uu u shaqeeyo habdhiska ku calaamadsan M

_____ (2)

d) Isku aadi habdhisyada ku calaamadsan K,M.N iyo X magacyadooda hoose. (4)

- i) Habdhiska Qashinsaarka _____
- ii) Habdhiska wareegga dhiiga _____
- iii) Habdhiska Neerfayaasha _____
- iv) Habdhiska Hawada _____

SU'AASHA 2AAD

(12)

a) Sheeg seddex siyaabood oo looga hortagi karaa cudurka duumada ama malaaryada?

_____ (3)

b) Magacow nooca ilma-aragtiga keena cudurka malaaryada?

c) U kala saar cuduradaan soo socda kuwo la isu-gudbiyo iyo kuwo aan la isu gudbin (8)

**Hargabka , Sonkorta , Qixdheerta , Indho-habeenaadka , Kansarka ,
Daacuunka , Aydhis , Dhiikarka**


Cudarada la isu-gudbiyo	Cudarada aan la isu-gudbiyo
1.	1.
2.	2.
3.	3.
4.	4.

SU'AASHA 3AAD

(6)

Isku aadi kabaalada iyo heerarkooda


1. Heerka 1aad
2. Heerka 2aad
3. Heerka 3aad



SU'AASHA 4AAD

(7)

Sawirkan hoose wuxuu muujinaya unugyada xayawaanka iyo dhirta



A) Labada unug keebaa ah unugga dhirta?

(1)

B) U kala saar seddex ay isaga mid ka yihiin iyo seddex ay ku kala duwan yihiin unugyada dhirta iyo xayawaanka.

(6)

Waxay isaga mid ka yihiin	Waxay ku kala duwanyihiin
1.	1.
2.	2.
3.	3.

SU'AASHA 5AAD

Nin ayaa adeegsaday xoog dhan **40 N** kuna qaaday fogaan 2 M. Hadaba soo saar hawsha la qabtay? (2)

SU'AASHA 6AAD

a) U kala saar walxahaan asiidhyo iyo baysas.

(9)

Walaxda	Asiidh	Bays
1. Dambaska		
2. Liinta		
3. Caano dhayda ah		
4. Cinabka		
5. Shaaha		

b) Isku aadi curiyaha iyo summadiisa

Curiye	Jawaab	Summad
1. Haydrojiin		a) Na
2. Kaarboon		b) O
3. Soodiyam		c) H
4. Ogsijiin		d) C

SU'AASHA 7AAD

a) Waa maxay footosintisis?

(5)

b) Sharax ka bixi faaiidada ay footosintisku u leedahay dhirta? (1)


c) Qor isla'eg- qoraaleed ee footosintiska? (2)

(5)

SU'AASHA 8AAD

Sawirkan wuxuu muujinaya adeegsiga birlabta

- a) Magacow qaybta ku calaamadsan C



(1)

- b) Sharax shaqada uu qabto qaybta ku calaamadsan xarafka B

(2)


- c) Sidee u caawisaa xarafka ku calaamadsan A adeegsiga birlabta?

(2)

(12)

SU'AASHA 9AAD

- a) Sawir ku muuji kalluun adigoo muujinaya indhihiisa, afkiisa iyo waafiyihiisa. (4)



b) Sharrax kooban ka bixi faaiidada kalluunka u leeyahay aadamaha?

_____ (2)

c) Waa maxay farqiga u dhaxeeya dillaacinta ukunta dabiiciga ah iyo tan aan dabiiciga ahayn?

_____ (4)

d) Magacow labo dulin-dibadadeed oo digaaga ku dul noolaan kara

_____ (2)

SU'AASHA 10 AAD

a) Sababee ujeedada laga leeyahay kaalmada deg deg ah? **(8)**

_____ (2)


b) Saamayn nooc ee ah ayuu fuuq baxu ku yeelan karaa qofka?

_____ (2)

c) Waa maxay todobka cirka?

_____ (2)

d) Ku sawir todobka-cirka sanduukhan dhankiisa midigta ah? **(2)**



Xafiiska Imtixaanka ee Puntland

Imtixaanka Sannad Dugsiyeedka 2018

Imtixaanka Maadada **Saynis** ee Fasalka 8aad

Dhammaad.